



Kooxda Dastuurka ee Dugsiga Grant, waxa ay ku guuleysteen inay socdaal ku tagaan Caasimada Wadanka Washington D.C.

Dugsiga Sarre ee Grant wuxuu ku guuleystay tartankii dastruurka gobalka ee “We the People” labo sanno oo isku xigta. Kooxda Generals waxa ay ka guuleystaan dhigooda Lincoln oo ay waligood tartamaan iyo afar kooxood oo kale bisha Janaayo 13keedii oo tartanku ka dhacay xarunta Maxkamada Mark. O Hatfield Courthouse. Dugsiga Grant wuxuu la tartami doonaa dhammaan iskuulada kale ee wadan bisha Abril 28 ilaa 30 keeda oo lagu qabanayo Washington, DC.

Dugsiga Grant wuxuu 17kii sanno ee la soo dhaafay ku guuleystan tartankani 12 jeer, tartankan oo la bilaabay sanadkii 1987. Dugsiga Lincoln kaalinta labaad galay isna wuxuu tartankan ku guuleystay 19 sanno ee soo hadhay.

Kooxda Generals oo tartanka wadanka ka galay kaalinta labaad sanadkii hore, waxa ay isku diyaarinayaan in kaalinta koowaad ku guuleystaan markii saddexaad. Dugsiga Lincoln wuxuu tgartanka wadanka ku guuleystay lix jeer, iyada oo markii ugu dambeysayna ahayd sandkii 2016.